# Buugga Tilmaamaha

CE

Panthera AB, Gunnebogatan 26, 163 53 Spånga, 08-761 50 40 , www.panthera.se, panthera@panthera.se

art.nr. bruks-brukarmanual-som Rev.2018-01

# Ujeedada loogu talogalay

Panthera waa kursi-curyaan loogu talogalay dadka u baahan kursi-curyaan maalin kasta ah, oo si dhib loo hawlgalin karo kaasi oo qofku si raaxo leh ugu fadhiisan karo. Wuxuu u samaysan yahay qaab aad si sahlan gaadhiga adiga laftaadu u saaran karto.

Si aad si buuxda ugu isticmaali karto Panthera, adiga (ama daryeel-bixiyaha kuu qoraya) waa inaad u habaysaan qaab aad si fiican u fadhiisan karto oo aad awood u yeelato inaad si raaxo leh u kaxayso, taasi oona waafaqsan baahiyaha aad qabto. Eeg tilmaamaha isticmaalaha.

# DIGNIIN!

Panthera waa kursi-curyaan ay sahlan tahay in la hawlgaliyo, laakiin sidoo kale ay aad u sahlan tahay in dib loo tiirsado. Haddii aadan la qabsan isticmaalka kursi-curyaanka, oo aan ilaaliyayaasha qallibanka ee kursiga aan loo samaynin, si sahlan ayaad dib ugu ciiri kartaa haddii jidhkaagu sameeyo dhaqaaq wayn, ama haddii aad samayso dhaqdhaqaaqyo dhakhso ah oo taayirrada laga wado ah. FADLAN OGOW! Panthera X iyo U3 Light, kuwaasi oo loogu talogalay kaxaynta heerkeedu sarreeyo, ma laha ilaaliyayaasha qallibanka.



S3



ILLAALIYAYAASHA QALLIBANKA (KU XIDHAN)

# Adeegsiga

Markii aad u baahato inaad ku qaaddo kursiga gaadhi, ka fur taayirrada laga wado, u soo laab tiirsiga kursiga xagga hore, kadibna saar qaybaha gaadhiga.

## Ka saarista taayirrada laga wado

Taayirrada laga wado waxa laga saari karaa iyadoo hoos loo cadaadiyo badhanka ku yaala badhtanka taayirka -- fiiri Sawirka 1. Kadibna si toos ah ayaad taayirka u saari kartaa. Si aad ugu celiso taayirrada laga wado, ugu horrayn hoos u cadaadi badhanka, kadibna ku hagaaji taayirka meeshiisa. Sii daa badhanka, kadibna dibadda u soo jiid si aad u hubiso in taayirku si fiican u haysto iyo in badhanku dibadda u soo baxsan yahay.



Saw. 1. Hub.




Saw. 2. Tiirsi.

## Soo laabista tiirsiga

Waxaad u soo laabi kartaa tiirsiga adigoo soo jiidaya waayirka (1) dhabar-xejiyaha (fiiri Sawirka 2) kadibna adigoo u laabaya tiirsiga (2) hore / gadaal. Marka hore waxaad u baahan kartaa inaad saarto buushka iyo waxa dhinacyada ka haya kahor inta aanad laabin tiirsiga. Si aad taag ugu dhigto tiirsiga, kaliya waxaad u baahan tahay inaad kala furto ilaa uu joogsado, dhabar-xejiyuhuna si otomaatig ah ayuu ugu xidhaa tiirsiga qaabka taagnida ah.
Panthera X iyo U3 Light ma laha dhabar-xejiyaha: dhabarku hore ayuu u soo laabmaa iyada oo ayna waxba xidhayn.

# Ilaaliyayaasha qallibanka (Panthera X iyo U3 Light ma laha shaygan)

Marka la eego taxanaha S3:
Ilaaliyayaasha qallibanka waxa loo leexin karaa dibadda ama gudaha oo adiga ayaa leexinaya bilaa kaalmo, markii aad ku fadhido kursi-curyaanka, adigoo hoos u cadaadinaya gacanka (1) oo leexinaya. U leexi ilaaliyayaasha qallibanka dibadda, si ay u tilmaamaan gadaal, markii aad doonayso inaad ka shaqaysiiso. Isku hagaaji dhulka inta aad u jirayso (3) adigoo gaynaya taayirka (2) mid kamid ah shanta meelood.
FADLAN OGOW! Ilaaliyaha qallibanka **waa inaan loo isticmaalin "bir janjeedhin" ahaan** marka**qaadista taayirrada hore ee kursi-curyaanka** si aad uga tallawdo caqabadaha, teedadka, iwm.
Marka la eego taxanaha S2:
Markii ilaaliyayaasha qallibanku ay shaqaynayaan (dibadda u baxsan yihiin), waad hagaajin kartaa inta dhulka aad u jirayso adigoo gaynaya taayirka mid kamid ah farta meelood ee ka muuqda Sawirka 3.
Ilaaliyaha qallibanka dib ayaa gudaha loogu soo celin karaa, qaabdhismeedka hoostiisa, markii aanad u baahnayn. Sidan waxaad u samayn kartaa adigoo hoos u cadaadinaya ilaaliyaha qallibanka, xagga dhulka, oo ku soo celinaya kursiga hoostiisa. Markii aad dibadda u leexiso ilaaliyaha qallibanka si aad u hawlgaliso, hubi inuu ku xidhan yahay meesha shaqaynta.




Saw. 3. Ilaaliyayaasha qallibanka (taxanaha S2 ee hoose)



Si aad wax uga barato wadista taayirka dambe ee kursi-curyaanka, waa inaad gayso ilaaliyayaasha qallibanka joog kuu saamaxaya inaad kursiga gayso meel dheellitiran.

Waxaad ka akhriyi kartaa hagaajinaha kale ee ay tahay in lagu sameeyo kursiga buugga tilmaamaha. Markii kursi-curyaanku sida saxda ah yahay, waxa fudud in la riixo, oo aanu caqabad kala kulmin jiho kasta. Haddii kursigu aanu u dhaqaaqin si sahlan, nagala soo xidhiidh Panthera AB.

# Badbaadada

Kursi-curyaanka Panthera wuxuu u samaysan yahay qaabka ugu sahlan marka la hawlgalinayo. Maadaama si sahlan loo hawlgalin karo, kursigu si dhakhso ah ayuu uga jawaabaa "amarrada" aad siiso. Haddii kursiga aad siiso amar qaldan, waxa dhici karta (tusaale ahaan) inaad dib u qallibanto haddii aanad lahayn ilaaliyayaasha qallibanka. Aad ayey suurtagal u tahay in kursi-curyaanku uu qallibmo – tan waa in had iyo jeer la xasuusnaado markii la hawlgalinayo kursi-curyaanka.

Hoosta, waxaanu ku soo ururinay xaqiiqooyin dhawr ah oo ay tahay in la ogaado badbaado ahaan.

# Dheellitirka, nuglaanta qallibanka

Meelaynta taayirrada kaxaynta, xagasha tiirsiga dhabarka, iyo hagaajinta buushka tiirsiga waa waxa saameeya in kursigu u nuglaado inuu qallibmo.

Marka la eego Panthera X iyo U3 Light, waxa saameeya dheellitirku waa ku dhagsanaanta dhabarka ee qacaayadda.

DIGNIIN! Iyadoo ku xidhan meesha dheellitirka ee lagu hagaajiyey, kursigu waxa dhici karta inuu qallibmo markii uu saaran yahay oogo janjeedha. Isticmaal ilaaliyayaasha qallibanka, ama u dhaqaaji taayirrada kaxaynta gadaal, haddii aad dareento in kursigu aanu degganayn.

# Biriigyada

Biriiggu wax badan ma qabto markii taayirradu leeyihiin cadaadis-haweed hooseeya ama ay duug noqdeen. Hubi biriigyada markii aad nooca taayirka beddelayso; cabbirka ayaa ka duwanaan kara. Biriigyada waxa loogu talogalay inay ahaadaan biriigyada baarkin dhigista, maya biriigyada adeegga.

# Qaabka aad u fadhido

Marka dambe barar ayaad yeelan kartaa haddii sida aad u fadhido qalad kujiro, ama haddii ilaaliyayaasha dhinacu ay cadaadis ku hayaan bawdyahaaga. Haddii ay hubinti la'aan jirto halkan, la xidhiidh daryeel-bixiyihii kuu qoray.

# Fuulista

Haddii masaafadda u dhaxaysa qaybta ugu hoosaysa ee meesha cagta la dhigo iyo dhulka ka hooseeya ay ka yar tahay 40 mm, meesha cagta la saaro waxa dhici karta inay qabsato taagagga yaryar ee dhulka, taasi oo kugu keeni karta inaad hore u dhacdo.

Haddii ilaaliyayaasha qallibanku kuu shaqaynayaan, oo aad dulmarayso cidhifka teed, waxa dhici karta ilaaliyayaashu inay qabsadaan teedka oo aad dhacdo. Haddii aad ka walaacsan tahay inay tani dhici karto, ilaaliyayaasha qallibanka meesha ka dhaqaaji oo kaalmo dalbo.

# Meelaha wax iskaga yaalaan haddii la qaadayo

Meelaha kursigu haysto haddii la qaadayo waa in si cad loo calaamadeeyo. Haddii kursi-curyaanka ay tahay in la qaado, ka fiiri qaybta kusaabsan buugga tilmaamaha, oo ka dalbo calaamadaha astaynta Panthera AB.

# Dhaqaajinta / qaadista


Kursiga oo culayskiisu yar yahay darteed, waxa loo dhaqaajin karaa dhinacyada markii biriigga la hayo, haddii aad doonayso inaad kursiga ka soo dhaqaajiso dhinac. Haddii aanad hubin tan, waa inaad ku celcelisaa habkan adigoo kaashanaya bixiyaha kuu qoray.

Haddii kursi-curyaanka loo baahdo in la qaado iyadoo qofku kujiro, qofku waa inuu had iyo jeer qaado isagoo isticmaalaya qolfoofka kursi-curyaanka. Waxaad ka arki kartaa meelaha qaadista ku habboon Sawirada 4 iyo 5.


Saw. 4 - Dhammaan kuraasta marka laga reebo Panthera Swing

Saw. 5 Panthera Swing

- ● Meelaha la qabanayo (fallaadhaha waawayn ee cascas)
- ● Meelaha uu qabsado suunka dhabtu (fallaadhaha yaryar ee cagaaran)



Saw. 4.



Saw. 5.

# Dayactirka

Panthera-haaga waxa loogu talogalay ugu dhawaan inaanu dayactir u baahan. Hase yeeshee, waxa jiro dhawr qaybood oo ay tahay inaad si joogto ah u eegto.

## Bishii halmar, waa inaad:

- Ku masaxdo qacaayadda shaambooga baabuurta ama saabuunta weelka iyo liif qoyan. Haddii uskagu ku adag yahay, waxaad isticmaali kartaa xaydh-biiye. Kadibna, xaydh mari dhammaan qaybaha dhaqaaqa.
- Nadiifi meesha taayirka hore kaga yaalo fanaxda. Timo, boodh, iwm. ayaa sida badan ku urura halkan, taasi oo dhaawici karta kuulaha. Eeg tilmaamaha isticmaalaha.
- Xaydh mari agsalka taayirka kaxaynta. Ka saar taayirka, kadibna mari dhawr dhibcood oo saliid ah agsalka.
- Buuxi taayirrada (fiiri buugga tilmaamaha). Taayirradu waa inay leeyihiin cadaadis ah 8 kg / bar.
- Hubi dhammaan iskuruuyada iyo boolasha, gaar ahaan halka tiirsigu ku yaalo; giiji haddii loo baahdo.
- Hubi inaan taayirku wax dhaawac ah lahayn. Haddii taayirku dhaawac qabo, isla markiiba nagala soo xidhiidh Panthera AB

## Laba jeer sanadkii, waa inaad:

- Mari qaybaha dhaqaaqaya ee biriigga dhawr dhibcood oo saliid ah.

- Dhawr dhibcood oo saliid ah mari bushashka ku yaala kala-goyska tiirsiga.

- Ku maydh buushka mishiinka maydhista 60° ah, markii loo baahdo.

Buugga Tilmaamaha

Panthera AB, Gunnebogatan 26, 163 53 Spånga, 08-761 50 40 , www.panthera.se, panthera@panthera.se